



Guddiga Maalgelinta Bulshada ee Degmooyinka Madaxabanaan ee Magaaladda Ismaamulka King County

Ismaamulka King wuxuu shaqaalaysiinta xubnaha bulshada si ay uga adeegan Guddiga Cusub ee Maalgelinta Bulshada. Guddigan ayaa ka caawin doonaa Ismaamulka King qarash gareynta...

- \$10 milyan ee mashruucyada rasumaalka Skyway-West Hill, North Highline, East Renton Fairwood, and East Federal Way. Lacagtan rasumaalka ayaa loo isticmaali karaa wax walba oo u baahan in la dhiso ama la beddelo, sida dhismooyinka, wadooyinka lagu lugeyo, wadooyinka baaskiilada.
- \$1,3 milyan oo loogu tagalay adeegyada ama barnaamijka Skyway-West Hill iyo North Highline. Lacagtan waxaa loo isticmaali karaa wax walbo, sida barnaamijyada dugsiga kadib, tababarista shaqada, dayactirka dhismaha, cuntada, qalabyadad farshaxanka, iyo maalgalinada dhismooyinka garoomda iyo wadooyinka lugta.

Guddiga Maalgelinta Bulshada wuxuu naqshadeyn doonaa oo qaban Nidaamka waxaa dub dhexaad u noqon doonaa sinaanta sirka, waxaan dhisi doonaa awoodaha bulshada, waxayna wax ka qaban doonaa mudnaanta bulshada ay aqoonsatay. Guddiga wuxuu hubin donaa inay bulshadu ay maamuli doonto lacagta la bixinayo, sidaa darteed mashruucyada la maalgeliyay waaan wax ka qaban doonaan dhibaatooyinka dhabta ah ee bulshada waxayna yeelanayaan faa'iidooyin badan.

Ismaamulka King wuxuu ansixin doonaa maalgelinta mashruucaan ku jira miisaniyadda labada-sano ee hadda (2021-2022), waxaana loo isticmaali doonaa sida ay fartay bulshada.

Shirkadda aan Sharciga aheyn ee bulshooyinka Ismaamulka King

Shaqada Guddiga Maalgelinta Bulshadu waxay xooga saari doonaan aagaga soo socda ee shirkadda aan sharciga aheyn ee magaaladda:

- Skyway-West Hill
- North Highline/White Center
- East Federal Way
- Fairwood
- East Renton Plateau

Baaxada Shaqada

Xubnaha Guddiga Maalgashiga Bulshada waxay hormarin doonaa uu hogaaminaya ka qeybgalka nidaamka miisaniyadda shanta ka midka ah bulshada kor ku xusan. Xubnaha bulshada ayaa loo sheegi doonaa inay u noqdaan safiirro bulshooyinka iyaga qoraya ka qeybgalayaasha iyo hogaaminta mashruuca hormarinta bulshooyinka.

Xubnaha waxaa laga filaya inuu ka qeybgalo kulmada 2-4 bulshada, ku bixinta 4-8 saac kulanka, bishiiba. Taaranka xubnimada koowaad wuxuu dhammaan doonaa ilaa Desembar 2022. Xubnaha ayaa magdhow la siin doonaa waqtigooda. Xubnaha shaqaalaha Ismaamulka King ayaa siin doonaa taageero xubnaha bulshada dhammaan kulumada.

Xubnaha ayaa xooga saari doonaa:

1. **Sinaanta:** Abuur nidaamka isticmaalaya ka qeybgelinta bulsho rasmiha si loo gaaro kuwa aad uga fog awooda dhaqameed, ilaha, iyo fursadaha. Abuur oo ka qeybgal dhammaan dadaaladda fidinta wajiyada (fikrad uruurinta, horumarinta mashruuca, codbixinta, qorsheynta, iyo qiimeynta). Marka aad dooranaysa mashruucyada, tixgeli maalgelinada wax ka qabta baahiyaha ugu weyn ee bulshada.
2. **Helida:** U ogolow dhammaan xubnaha bulshada si ay uga qeybgalan nidaamka. Sii turjumista iyo fasiiraada luuqada, helida hoyiga loogu talagalay kulumada. Uga qeyb qaado bulshada qaabab daboolaya baahiyada dadka da'da kala duwan ee leh xajmiga waxbarashada kala duwan.
3. **Isla Xisaabtanka:** Sameeynta qabab lagu cabiro sida guddigu uu si firfircooni ah uga hawlgalayo dadka aan ku lug laheyn dowladdii hore ama howlaha miisaaniyada. Ku wargeli oo kala hawlgal qof walba oo ka mid ah dadka deegaanka wax walba oo ku saabsan nidaamka, jadwaladda, aqoonsiga mashruuca, soo gudbinta, iyo xulashada.
4. **Mudnaanta iyo qiyaasta qarashka:** Xaqiiji liiska baahiyaha aagaga bulshada (liiska baahiyaha la abuuray iyada loo isticmaalayo talada bulshada iyo wada hadalada). Mudnaanta mashruucyada iyo qiimeynta qiyaasta qarashka ee loogu talagalay mashruucyada taas oo ay tixgelin doonto bulshada wixii maalgelin ah.

Masuuliyadaha Ismaamulka King iyo doorarka

Taageerada guddiga leh maamulka, waxbarashada, maareynta mashruuca, fududeynta, wareega qarashka, iyo go'aanada la xiriira isticmaalka sharciga ah ee lacagaha. Sii tababar, la socod, iyo tababar si uu uga caawiyo kooxda inay si hufan u maraan nidaamyada dowladda. Ismaamulku wuxuu sidoo kale siin doonaa miisaniyadda bulshada adeegyo la xirii ka qeybgalista nidaamka miisaniyadda.

Xubnimada iyo nidaamka xulashada

Xubanimada Guddiga Maalgelinta Bulshada waxay u furan tahay dhammaan xubnaha dadweynaha ku nool, ka shaqeya, dhigta dugsiga, ciyaarta, iyo/ama goobaha cibaadda bulshada raba inay matalaan. Si kastaba ahaate, xubnaha shqaalaha Ismaamulka King waxay qaadi doonaan tallaabooyinka lagu shaqaaleysiinayo dadka midabka iyo LGQBTIA, dhalinyarada, dadka waaweyn, dadka soo galootiga, qaxootiga, iyo dadka dhaqaaladoodu u hooseeyo ama dadka naafada, iyo dadka kale ee ka tirsan kooxaha aan la matalin.

Guddiga waxaa ku jiri doonaa wakiilo ka socoda bulsho walba oo kor lagu xusay. Wafdi oo ka socda aaga adeega wuxuu ka mid noqon doontaa isku dhaf ay ka mid yihiin wakiilada ka socoda ganacsiyada iyo ururada ku saleysan-bulshada, dhalinyarada ka yar 21, iyo "dhammaan" xubnaha matala bulshada oo dhan.

Ismaamulka King wuxuu la wada hawlgali doonaa ururada bulshada ee bulsho walba si loo soo qoro iyo xulshada codsadaayaasha deegaanka.

Si aad u codso si aad ugu adeegto guddiga, ku buuxi foomka codsiga online-ka ah Ingiriis, Axmaarig, Carabig, Shiines, Jabanese, Khmer, Kuuiryaan, Raashiyaan, Soomaali, Isbaanash, ama Fiidnamees <https://kingcounty.gov/UrbanChoices>. **Waqtiga kama dambaysta ah ee la dalbanayo waa Jimcaha, Abriil 16, 11:59 pm.**

Si aad ugu codsato macluumaadkaan luuqad kale ama qaab kale fadlan wax 206-477-3800 ama email AskLocalServices@kingcounty.gov.